# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Kal-fadhigii 39aad Fadhigii 16aad

**Sabti 06 April 2019**

**Quraanka: -** Md. Xaamud

**Gudoonka:-** Gudoomiye Baashe M. Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-** Doodda wax la badalka iyo kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka

**Md. Farxaan Maxamed Cali: -** (**4min 34sec):-** Gudoomiye horta guddidu xeerka si fiican bay uga soo shaqaysay, waana uga mahad naqayaa guddida sida fiican ee ay uga soo shaqeeyeen xeerkan, marka labaad waxa xeerka ka maqan oo aan ku dari lahaa dalkeena maxkamadoo kalilya inaguma filna, dadku si ay u kala baxaan waxa jira maxaakiim ay dadku samaysteen oo dadku raali ka yihiin xeerarkii horana waxa ay ogalaayeen in ay isugula tagi karaan maxakmadaha furan ee shacbiga ah.

Maanta waxa mooddaa xalka ugu badan soo jeedinta guddida waxa ka badalkeeda waxa ku qoran waa maxkamadaha xeerku cadaynayo, marka waxa aan ku dari lahaa waxa weeyi maxkamadaha furan in xeerku cadeeyo oo muujiyo oo dadku ku kala baxo iyaguna (maxkamadaha) ay go'aanka shaambadeeyaan oo maxkamaduhu ay intaa yeeshaan, xeerka waxa aan ku dari lahaa intaas uun.

Guddidu waxa ay yidhaahdeen waxan samaynaynaa xeer gaara oo uu xeekaasi waxa uu cadaynayaa maxkamadaha shareecada islaamka ee Gobalada dalkoo dhan ka samaysaan, dadka doonayaa inay kala baxaan maxkamadaa bay tagaan islaamiga ah, dadka iska dhacayaana anagay noo yimaada, inay racfaanka sanadada qaadanaaya iyo is daba wareegan, si ay u fududaato, xataa maxkmadaheena ayaa u dira shareecada islaamka, oo dadku racfaan kama qaatan waana ku qanacsan yihiin inay si cadaalada u kala saareen, Marka waxan odhan lahaa xeerkeena aynu ku darno.

Qodobka labaad ee aan ku dari lahaa waxa weeye xeerka madani ah marka laga tago xeerka ciqaabta, waxan isticmaalaa oo ilaa hada aan isticmaalnaa xeerka aynu ka dhaxalnay guumaysigii iyo isticmaarkii oo wali ku shaqaynaa xeer baana dhigaaya oo odhanaayo waxa lagu dhaqmayaa xeerkan, saw maaha in guddi loo saaro oo ay is waafajiyaaan, shir-gudoonkeena iyo shareecadeena.

Xeerka ciqaabta guud waa in dib loogu noqda oo la waafajiyaa xeerkan iyo distoorkeena, waayo ma waafajisana waa mid talyaanigii inoo dhigay penal cord-kii, waxa weeyi maanta dastuurkeena ma waafajisna, shareecadeena ma waafajisna.

Guddida inta kale waa u mahad naqayaa aad iyo aadna waa ay uga soo shaqeeyeen, guddidana waynu wada hadalnay oo waxa ay yidhaahdeen xeerkaa xeerbaa waa fajinaya xeer baana soo saaranaynaa, gar ahaan shacbigu ciqaabta guud suuqa laguma qaado, ciqaabta guud dawlada leh, waxa weeyi madaniga na waa ay ka wada hadlayaan.

Madaniga suuqa waa lagu qaadi kara waana lagu kala saari karaa, lakiin ciqaabta guud dawladaa iska leh, madaniga way u tagi karaan ciday isku ogal yihiin inay u garnaqdo, ama miyigii iyo geedkii ha noqdo ama xafiiska ah ahaadee oo u samaysan si maxkamaden ha noqdee, waxa weeye qodobka kale waa in lagu daro oo ah maxkamad dadku isla ogal yihiin waa la iskula tagi karaa oo waa lagu kala bixi karaa. Maxkamadaha gobalku ha laga shaambadeeyo si ay dawladuna u ogaato oo uu wax diwangashan u noqdo dawladuna la socoto.

**Md. Cabdiraxmaan Maxamed Jaamac (Aw-xoog)** **(19min 35sec):-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo martishartaba waad salaman tihiin, Mudanayaal inagu hadaynu nahay waaxda xeer-dajinta door keenu waa u dooddista dadkii ina soo doortay daba-gal iyo ilaalinta waxa ha kale ee qaranka sida fulinta iyo garsoorka.

Garsoorka oo ka kooban maxkamadaha iyo xeer-ilaalinta waa lagama maarmaan inay dhex u noqdan shacabka soomaaliland, shicib iyo dawladba intaba oo ayna ku mil min hawshooda ay soo fara-galin, hadaan xeerkan nidaamka garsoorka aan la soo midayn xaaladii ay ku sugnayd waaxda garsoorku tan iyo sanadkii 2008dii, oo lagaga dhaqmaayay labo xeer ama ay maxkamaduhu ku dhaqmayeen labo xeer oo isku magaca lakiin kala qodobo badan mid yahay 50 qodob ka kalana yahay 60 qodob oo labadaba ay ahaayeen xeerar dhaqan gal ah.

Waxa ay ahayd xaalad jahawareer oo wax badan u dhintay xil-gudashadii waaxda garsoorka, xeerka nidaamka garsoorka **xeer no 24/ 2003** sababta aan leeyah jahawareer bay cid waliba kay doonto ayay ku dhaqmaysay halkan waxa aan ku haynaa oo Guddida Dastuurka Garsoorka iyo Cadaalada ee Golaha Wakiilada ay soo gudbiyeen waxa ay usoo gudbiyeen labadii xeer oo ay mideeyeen oo wax ka badal iyo kaabis lagu sameeyay.

Marka waxa ay inoo soo gudbiyeen wax ka badal ay iyagu sameeyeen, june 2016kii waxa la keenay qabya qoraal cusub oo ah xeerka nidaamka garsoorka oo lagu mideeyay labadii xeer, labadii xeer nidaam garsoor ee is dhex wareegayay mid qudha la iskaga dhigay, nuqulka soo jeedina hal xeerka oo midaysan oo goluhu wax ka badal iyo kaabistooda waxa ugu wayn mabaa'diidooda lagu xoojiyo xeerka nidaamka garsoorka, waxay dhimeen aqoonyahanadiii iska kaashaday ee guddidan xeerkan usoo gudbiyaya golaha waxa ay gun dhig uga dhigeen madax banaanida hay'adda garsoorka oo fara-galinta ugu wayni ay kaga timaado waaxda fulinta, oo ah kolba xukuumada markaa wadanka ka taliso.

Waxa waaxda fulinta ama xukuumadu cadaysatay inay iska indha-tiraan oo si cad u jabiyaan Qodobka 41aad ee Farqada 2aad ee dastuurka kaas oo damaanad qaadayaa xoriyada muwaadinka Qodobka 41aad Farqada 2aad ee dastuurka, waxa uu oo dhanayaa ma banaana in qofka la qabto oo la baadho ama la xayiro hadii uu san markaa danbi faraha kula jirin ama aanu amar qabasho oo sababaysan waliba ku soo saarin garsoore awood u leh.

Hadii iyada oo aan la haysan amar qabasho oo sababaysan oo uu soo saaray garsoore awood u lihi, muwaadin hurda oo qaawan in habeenkii loo soo daato, miyaana la faragalin madax bananidii garsoorka?, jawaabtu, waa haa waa la faragaliyay, garsoore awood u leh uu soo saaray uun baa qofka lagu qaban karaa.

Markaa waxaan leeyahay hadaan inagu nahay waaxda xeer-dajinta ma faragalino waaxda garsoorka, waaxuhuna waa ay kala madaxbanaan yihiin waxaana kala madax banaanid kala siiyay dastuurka, mucda iyo wax ka badal keena qodobka ugu wayn ee la soo qaatay waxa weeyaan, waa u gaar yeelida xilka garsoorida maxkamadaha dalka iyo waaxda garsoorka oo laga ilaaliyay sida wax ka badalkan wixii fara galin ah.

Hadii aan idiin iftiimiyo qodobada wax ka badalka iyo kaabista lagu sameeyay ee ay guddidu inoo keentay waxa lagu soo ururiyay, qaybta ciwaankeedu yahay mabaadida lagu xoojiyay wax ka badalida iyo kaabista xeerka, oo uu ugu horeeyo farqada odhanaysa sidaan imikaba sheegay ugaar yeelida xilka garsoorida maxkamada dalka.

**Qodobka 6[aad] farqadiisa 1[aad]** waxa weeye awooda garsoorida dacwada waxa iska leh maxkamada oo kaliya cid kalana looma wareejin karo, farqada 2aad waxa ka reeban maxkamada gaara oo ka baxsan hay'addaha garsoorka Somaliland, qodobkaa maxakamadaha ka baxsan, waa maxkamadihii guddida nabadgalyada gobalka, somalilland waxa ay ka dhaxashay dawladihii militaryga ahaa.

Guddiyo leh awood iyo dabeecad garsoor sida guddida nabadgalyada gobalka oo ay isticmaalaan dawladaha militarygii ee afganbiga dalka ku qabsaday, markaa qodobkana waa qodob muhiiima ah oo joojiyay awoodihii ka baxsanaa maxkamadaha, awood shicib oo ah mid ciqaabeed iyo mid madaniyaba leh, Qodobkaa in sidiisaa loo qaato ayaan soo jeedinayaa.

Waxa kale oo laga hadlay tayaynta garsoorka in la tayeeyo, garsoorku waa sax madax bananida waaxda garsoorka xilkeeda iyaduna waa waxaan ka hadlayay yaan la fara-galinin, kor uqaadidda badbaadinta shaqo, gudoomiyaha iyo garsoorayaasha maxkamada sare, imika waxaynu la soconaa maxkamada sare gudoomiyaheedu waxa magacaaba madaxwaynaha, waxaana fadhi wada jira ku ansixiyo golayaasha.

Hasa yeeshee garsoorayaasha iyaga waa la magacaabaa golahana lagama ansixiyo, halkan wax ka badalkan waxa lagu soo sheegay in Golaha Wakiilada laga ansixiyo,

arrinkaa aad baan u tageerayaa sababtoo ah garsooruhu haduu xukun rido barrito waa loo yeedhayaa waa la eryayaa markaa job security malaha, nin wal wal qaba oo barito la eryaayi dee garsoore kuu noqon maayo, arinkaa marka 100% waan raac sanahay.

Kor u qaadida iyo kor iska illaalinta waaxaha dawlada check and balance qodobkaana waa qodobka aan hore uga soo hadloo, inagu ma faragalino seddexda waaxood hadaynahay xeer-dajinta, laakiin qolada loo tag laa yahay waa qolada fulinta, qodobkan waa in sidiisa loogu qaataayoo kor iska ilaalinta iyo is-dheeli tirrka, maaha inaad tilifoon u dirto dacwad socoto oo aad faragaliso waxaan leeyahay qolada fulintu haka waan tawdo.

Qodobada markaa aan yara dul istigaay wax ka mida **Qodobka 10aad** ee xeerka, wuxuu odhanayaa dhisida iyo baab'iinta maxkamadaha hadii loo baahda guddida cadaaladu waxa ay samayn kartaa maxkamad cusub ama qayb ka mida maxkamad jirta waa ay baabi'in kartaa maxkamad jirta ama qayb ka mid ah, halkan waxa ay leeyihiin guddidii cadaalada ayaa la siiyay awood xad dhaafa oo la leeyahay maxkamad dhan bay baabi'in kartaa, anigu waxan odhan lahaa oo aan halkaa ku badali lahaa, Waxa maxkamad samayn kara ama baabin kara xeer baarlamaan, lakiin maxkamadahaa la samaynayaa, maxkamadaha awoodahoogu iyo darajooyinkoodu dastuurkaa sheegay, wuxuu bayn hoos imanayaan maxakamadaha jira nidaamka Faransiiska iyo Ingiriiska waxa jira wax la yidhaahdo maxkamad maamul (administration court) wadankeena kama dhisna wax kastoo ay qaban lahayd maxkamadii maamulku maxkamda kale ayaa ka garnaqdo waxana ka mid ah cashuurta (taxation), waxa kale oo ka mida mida shaqaalaha (labour court), waxa kale oo kamida mida socdaanka ah (immigration court).

Waxa kale oo jirta maxkamado sidii xildhibaankii iga horeeyay sheegay ay dadku ku qanacsan yihiin oo ay iskula tagaan oo ay ku kala baxaan oo ayna racfaan ka qaadan oo la yidhaahdo maxkamada shareecada, maxkamda shareecadu waxa ay dawladu siisay ruqsad, ruqsada ay siisay si cadaalada dadka ay kula xaqsooraan marka ay u garsooraan dadku way ku qancaanoo dhaxalkay ku kala qaataan, nabaraday ku kala qaataan racfaana kama qaatan sababtoo ah waxa ay ogyihiin laaluushna kama rabto dhana ma raacdo, waxaan odhan lahaa xeer Golaha Wakiiladaa aassaasi kara halaga saaro qodobkan 10aad in guddida cadaalada la siiyo awooodaa waa in la siiyaa Golaha Wakiilada ama xeerdajinta oo dhan labada gole ee xeerdijinta ah ee la yidhaahdo Baarlamanka, marka ha sameeyeen labadaa maxkamadood ee ah maxkamada mamaulka, waxyaabihii aan soo sheegay ee sida cashuuraha, shaqaalaha iyo socdaalka ay hoos imanayaan iyo wixii la mida, imika toos buu ugu tagaa maxkmada sare iyo maxkamada shareecada islaamka ah, oo imika u furan sidii nootaayada.

Xeer ilaalinta dacwadaha ay soo saarto way aqbalaan laakiin wali lama samayn xeerkii lagu aassaasayay, halkana laguma cadayn samayntoodiina waxa la siiyay guddida

cadaalaada, marka waa in Qodobkaa 10aad in meesha laga tuuro, laguna badalo in la soo saaro xeer ay xeer-dajintu samayso laguna aassaaso maxkamada maamulka iyo maxkamada shareecada.

**Qodobka 15aad** waxan isdul taagayaa in uu garsoorku indhaha ka laliyo ama uu ku eego indha laan qodobkan waa in ay maxkamaduhu ku dhaqmaan ku dhaqankiisa uun baa la isku haystaa ee qodobkii meesha waa lagu soo daray, waxaan adkaynayaa in lagu dhaqmo.

Hawl-wadeena garsoorka waxa ka reeban inay ka mid noqdaan ururada ama xisbiyada dalka iyo ku lug lahaanshaha ababul kasta oo siyaasadeen madaama hay'adda garsoorku ka kooban tahay maxkamadaha iyo xeer ilaalinta sida Qodobka 15aad farayo waa inay dhex u noqdaan qaranka jamhuuriyada Somaliland, shicib iyo dawlad in taba oo ayna ku milmin hawshoodana ay soo faragalin labada waaxood ee kale ee fulinta iyo xeer-dajintu, maalin dhawyd waxan arkaayay ninku dooddayay qodob kee u diidaaya in uu xisbi ku biiro, shaqaale, garsoore iyo xeer-illaaliye dastuurkaa u diidaaya oo qodobkiisa 15aad baa u diidaaya, waa la maqlaysaa laguuma ogala in aad xisbi ku milanto ama aad ka mid noqoto.

**Qodobka 16aad** ku dabradaanta u hogaansanimada xukuumada ee garsoorka sida qodobka 16aad farqadiisa 1aad xukun kasta oo garsoor oo kama danbays hi wuxuu leeyahay awood sharci iyo awood fulineed, awoodaa fulintu waxay dhutinaysaa fara-galin oo awood maamul iyo mid siyaasadeed oo kaga timaada maxkamadaha xaga waaxda fulinta ayaa qodobka 16aad ee xeerkan ayat ka hor yimaadaan.

Waxan mar labaad u soo jeedinayaa waaxda fulinta inay qodobkaa tixgaliso garsoorka kama danbaysta ah ee la fulinaayona sidiisa u fuliso Wasaarada Aarimaha Guduhu, waxaan filayaa sidaan idiin sheegay wax ka badal kan iyo kaabistan aad baa looga soo shaqeeyay, khubaraa u fadhiisatay, shirwaynihii aan soo sheegay ee cadaalada ayaa lagu soo gurfeeyay, qareenadu contribution bay ku dareen guddiduna waa ay inoo soo kordhiyeen.

Marka inta aan sheegay laga tab-taabto waliba qodobkaa aassaasida maxkamada awoodoodda, awooda hala saaro, waxan leeyahay intaa halaga hagaajiyo hala sii daayo waa loo bahan yahay in labadan xeer la mideeyo oo garsoorka jahawareerka laga saaro.

**Md. Maxamed Axmed Maxamed (dhakool)** **(6min 44sec):-** Golaha iyo Saxaafada waxaan idinku salaamayaa salaanta islaanka ASC, Mudane Gudoomiye, xeerkan waxaan filayaa waa xeer xasaasiya oo nabadgelyadeena iyo cadaaladeena intaba xasaasi u ah.

Waxaadna moodaa xeerkan laftigiisa inay ku cadahay in markii horeba laba xeer oo isbarbar socdaa ay ahaayeen, iyagoo sidaas isku barbar socda inay inoo yaaleen oo xeerkii nidaamka garsoorka xeerar kala duwan uu ahaa, markii la mideeyayna waxaad moodaa

awooda waxaa la saaray oo kaliya awoodaha Maxkamadaha haday ciqaab tahay iyo haday madeni tahayba.

Waxaad moodaa ragii samaynayay khayr Allaha ha siiyee inbadan bay dadaaleen, laakiin waxaad moodaa in aan dareen wax shuruucda islaamku ay ka qabto garsoorka oo badani aanu ku jirin, haday tahay eray bixinta iyo haday tahay maxkamadaha islaamiga ah kaalinta la siiyay labadaba inay tahay kaalin aad iyo aad u liita.

Anigu waxaan leeyahay oo soo jeedinayaa marka laga saaro **Qodobka 4aad** inta kale waxaan qabaa inay tahay wax la qaadan karo oo wax lagu dari karo u-gaaryeelida xilka garsoorka maxkamadaha dalka waxaan soo jeedinayaa awooda garsoorka dacwadaha lagu gaadhayo maxkamadaha waxaana si cad loo mamnuucay in awoodahaas loo wareejiyo haayadaha ka baxsan garsoorka .

Markaas waxay calaamadinaysaa garsoorkii baan cadayn marka la eego **Qodobka 17aad** ee dhismaha maxkamadaha baa wuxuu uu cadaynayaa inay yihiin 7 Maxkamadood oo keliya markaa waxaan leeyahay xeerkan aynu gacanta ku hayno laba qodoba aynu ku cadayno, waa marka koowaade maxkamadaha islaamiga ah oo sidaa xildhibaanadu sheegeen haday cadaalad tahay iyo haday kalsooni tahay labadaba kalsooni lagu qabo ama looga cadaalad roonyahay garsoorkeena kale in uu cadeeyo oo aan la xaqirin, kelmadaha eray bixinta ah ee dhawrka ah ee ku jira halkana waa in la saxo.

**Qodobka 8aad xarafkiisa (X)** Cadaaladda istimaaciga ah maxaa loola jeedaa cadaalada istimaaciga ah? Waxaan leeyahay cadaalada istimaaciga ah magaranayo wax loo adeegsanayo waxaan leeyahay taas halaga saaro kelmadaas waa awoodaha garsoorka, cadaalada istimaaciga ah ma macnaysna waxay tahay hadaanay ahayn wax luqad ahaan aan afsomaliga iyo shareecada islaamka midna aan lagu sharixi Karin cadaalada istimaaciga ah, Waxaan leeyahay qodobkaas halaga saaro wax balaayo ah ayaa loo adeegsan karaa qodobkaas meesha halaga saaro.

Waxaan leeyahay **Qodobka 10aad** ee dhisida iyo baabi'inta Maxkamadaha gebi ahaanba meesha halaga saaro sidaa uu sheegayo xildhibaanku waxaan raacsanahay awood garsoor iyo gudidii cadaaladu inay maxkamad dhisaan oo baabi'iyaan inaanay xaq u lahayn iyana qodobkaas halaga saaro.

Waxaan leeyahay dhawr eray bixinood oo ku jira **Qodobka 12aad** meelaha ay ku qoran tahay **ijtimaac** in loo bedelo **jamhuur** sababtoo ah ijtimaac waa wax aan laysku khilaafsanayn mar hadii garsoor la qaadayo waa in loo bedelaa jamhuur oo macnaheedu yahay dhanka loo badan yahay.

**Qodobka 14aad** dabaqaada shuruucda oo ah dabaqaadka shuruucda waxaan leeyahay marka la leeyahay shaaficiya waxaa ka muhiimsan oo ka salbalaadhan shareecada

islaamka madhabtaa in meesha laga saaro oo la yiraahdo shareecada islaamka taas ayaa dastuur ah.

**Qodobka 71aad** oo ah karateeriyada qofku uu yeelanayo xaga dada marka la eego oo 25 ah waxaan leeyahay halagu daro lab oo garsoorkeena yaanay barri dumar inoo soo fadhiisanin islaamo inakala xukuma oo aanay shareecadeenu dhuuboolin yaynaan ka yeelin, waxaana leeyahay taana halagu cadeeyo, Mudane Gudoomiye xeerkaa dad culimo ah oo waafajiya haday luqad tahay iyo haday xukun tahay wixii qawaaniintaana iyo shareecadeena dibada  ka ah halagu daro oo dib haloo soo habeeyo waxaa ku jira waxyaaba farabadan oo hadii ay tahay luuqada iyo hadii ay diimaha tahay iyo haday cadalada tahay shareecada islaamka yasid u ah, waxaan leyahay ha lagu daro gudi culima ah oo dib usoo habaysa, Walaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu”.

**Md. Cabdiqaadir Jaamac Xaamud (6min 13sec):-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo marti sharaftaba waan salaamayaa, hadaan hordhac yar ka bixiyo erey bixinta isna dul taago, Xubnaha Garsoorida ee Maxakamada sare ee darajooyinka kala duwan leh, Qareen waxaa loola jeedaa qareen haysta rusqad, Maxakamada Darajada koowaad waa Maxakamada Degmooyinka iyo Gobolada

Gudida Cadaalada, Gudidaasi shaqo ay hada qabataa ma jirto, wayna magacaaban tahay, hadaba waa in shaqadeedii qabataa oo wixii loo igmadey sameysaa, waayo sharcigaa u fasaxaaya in sharcigeedii qabataa, wax shaqo ahna imika mahayso ee waa baarkin, sidaas darteed, waxaa in ay Gobolada iyo Degmooyinka tagto, waayo waxaa jira dad badan oo u baahan oo masaakiin ah oo raba in xaga sharciga laga caawiyo, cadaalad darona ku dhacdey, dacwada tashiga ah waa dacwada ay dhegeystaan Xukuna ka gaadhaan Garsoorayaal badan.

Dacwada tashiga ah, waa dacwada uu dhageysto hal Garsoore oo leh aqoon sharci Jaamacadeed, runtii Gudida Shuruucda aad ayaan u soo dhoweynayaa waxbadan way soo qabteen, laakiin mar qudha kamey hadal dastuurka, Xeerar badan yaa sheegaaya oo leh xeer ayaa qeexaaya, iyaga ayaana  loo igmada inay ka hadlaan oo Xeerarkaas qeexaya ay ka soo shaqeeyaan, dastuurku ilaa 17 Sanadood ayuu shaqeynaayey intii Soomaaliland jirtey waxna laguma kordhin waxna laguma darin, waayo waxay ahay in wax laga badelo waxna lagu daro ileen aayad Quraana maahee, halana furo dastuurka kuwa qaylinaya ee difaacayana  ha iska daayaan,ee moodaya in Sumadooda ku taalo,waa wax Somaliland ku wada Shaqeyneyso oo ku badbaadeyso

Hay’addaha Garsoorka wax ay ka kooban tahay Maxakamad iyo Xeer ilaalinta halkaas waxaa ku darey Gudida Cadaalada waayo kama maari karo Gudida Cadaalada

**Md. Cabdiraxmaan Cismaan Caalin (9min 10sec):-**  Gudoomiye sida ku cad Xeerka waxaa layidhaahda Xeerka nidaamka Garsoorka Somaliland waxaanu nidaaminayaa qaab dhismeedka Dastuurkeena iyo qaabka loo isticmaalo dacwadaheena iyo habka

maamul, waxaa muhiima markaa sidaa uu sheegaayo ujeedada Xeerku afar qodob ayuu ka hadlayaa iyo inuu la  shaqeeyo hay'addaha gacan saarka ay leeyihiin, hadaba marka aynu ka hadleyno Xeerka Garsoorka shan meelood waa in aynu saaro awooda, sida ujeedada xeerka ee aynu ka leenahay in Garsoorkeenu  dhismo, waana in aynu cadeynaa.

Arrinta kale, waa mabaa'diida xeerka oo ku xusan **Qodobka 6aad** waxaan leeyahay labadaas Qodob si fiican ayay u mideysan yihiin, intaas markaan ka tago waxaa la soo qaadey in laba xeer jiraan,  labo xeer ma jirine waxaa jirey Qodob la isku khilaafsan yahay oo labada Xeerba ku jirey

Hadaba, xeerkii afarta Qodob ahaa ee 2006kii ayaa Gudidu ku soo dartey Qodob 30aad oo ahaa Qodobka I0ad oo maadaama Gudoomiyaha Maxakamada sare ay labada Gole ansixiyaan fadhi wada jir ah, Garsoorayaashana sidaas laga dhigo oo iyagana awood dheeraada la siiyo Garsoorayaasha, sidaas darteed, Qodobkaas waa laga biyo diidey dabdeena Qodobkii la isku hayey ayaa Madaxweynihii waqtigaa la gaadhsiiyey in Qodobkaasi halis ku yahay sidaasaana lagu hakiyey qodobkii, hadaba halkaas ayaa is hor imaadku ka yimi, anigu waxaan odhan lahaa Xeerka aad ayaa looga soo shaqeeyey aad ayuu u yahay waadix Gudidana aad ayaan u amaanayaa Shaqadaas fiican ee ay soo qabteen

Sadexda meelood ee Xeerkani saarayo muhiimada waa in Gudoomiyaha labada gole Ansixiyaan, Garsoorayaashana kalsooni lagu siiyo in aan la iska eryi karrin ee Goluhu ansixiyo erigooda iyo qoristoodaba, hadaba halkaas cadaan ayuu ka yahay waan inta aynu doonaynay ee ahayd kalsoonida Madaxbanaanida ee Garsoorka, waa in Garsoorayaasha Gudoomiyihiisa la siiyo kalsooni dhab ah, anigu waxaan odhan lahaa Qodbkaasi sida uu u qoran yahay ayuu sax ku yahay, Qodobka 53aad ee Gudida Cadaalada waxa weeye Gudida cadaalada maamusha Garsoorayaasha ka shaqeysiisa, erida Garsoorayaasha, anshaxmarinta, kormeerka Garsoorayaasha khaldamey ama dalacsiisa Garsoorayaasha shaqada fiican qabta

Markaas, Xeerkani wax uu aad u cadeynayaa in maamul cad loo sameeyo gudida cadaalada, waayo si cadaana yaa looga hadley shaqadoodii waxaanan u arkaa in la siiyey madaxbanaani fiican, waxaan kale oo ku yara noqon lahaa awooda Garsoorkeena wax uu sheegayaa shan farqadood oo awoodaha Garsoorka ah, maxakamaduhu marka ay wax xukumayaan wax ay cuskanayaan, shareecada islaamka iyo dhaqanka guud ee bulshada, anigu waxaan odhan lahaa shareecada Islaamku qayb ayey ka tahay xukunka dalkeena Dastuurkuna diiddi maayo.

**Md. Cabdilaahi Xuseen Cige (Balaaki)** **(3min 22sec):-** Shir-gudoonka iyo xildhibaanadaba waan salaamayaa, run ahaantiina waan la qabaa in lagu amaano guddida ka soo shaqaysay Xeerkan, waxaanan qabaa in goluhu si xoogan uu ugu amaano. anigu waxaan soo jeedin lahaa laba qodob oo yar-yar oo midi yahay **Qodobka**

**30aad** ee xeerkan oo ka hadlaya awooda Maxkamadaha Dasturriga ah oo ah "*maxkada Dastuuriga ahi waxay awood u leedahay dhagaysiga moranada ku saabsan waafaqsanaan la'aanta dastuurka ee xeer dhaqan galay ama qodob xeer oo dhaqan gal ah ama fal-xukuumadeed* " maadaama oo uu dastuurkeenu leeyahay marka horaba "*xeer ka hor imanaya dastuurku waa waxba kama jiraan*" sidee buu u dhanqan galayaa hadii uu dastuurka ka soo hor jeedaba, markaa anigu waxaan qabaa si aan halkaa jaanis looga helin ama aan wax looga doonin xeerar dhaqangalay oo aan arrimo siyaasadeed looga faa'iidaysan waa in laga saaraa "*Xeerar dhaqangalay*"

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in halkaa lagu daro **Farqad 4aad** oo odhanaysa xeerarka iyo go'aamada ka soo baxa golahayaasha qaranku si aan maxkamada si kale looga faa'iidaysan ama aan dano kale oo siyaasaddeed looga faa'iidaysan executive-ka in la yidhaahdo ma faro-galin kartaan, waxaa xeer golayaal soo saareen hadii ay maxkamadaha, xukuumada ama cid kalaba turjumada ay doonayso uga bixiso, anigu waxaan qabaa in farqadaa lagu daro oo la yidhaahdo "*Go'aamada Golayaasha Dastuuriga ah ama golaha wakiilada iyo guurtidu soo saaraan xeerarka dhaqangalay ee Dastuurka aan ka hor imanayn maxkamada Dasruutiga ahi ma farogalin karto in farqadaa lagu daro ayaan soo jeedinayaa.*

Qodobka kale, waa qodobka Guddida Cadaalada anigu waxaan qabaa in awooda Guddida Caadaalada laga saaro in ay iyagu maxkamado samayn karaan, waayo xeer uunbaa samayn kara ama xeerkan ha noqdo ama mid kale ha noqdee oo hada xeerka ha lagu daro oo aynu maxkamadaha kordhino ama xeer kalaba ha loo aassaaso hadii ay baahiyi timaado'e waxaan qabaa in Qodobkaana laga saaro, waad salaamantihiin waanad mahadsantihiin

# Kal-fadhigii 39aad Fadhigii 17aad

## Axad 07 April 2019

**Quraanka: -** Md. Xaamud Cismaan Cigaal

**Gudoonka: -** Md. Baashe Maxamed Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-** Doodda Xeerka Nidaamka Garsoorka Maalintii 2aad

**Md Maxamed Xaaji Xuseen Ciise (15min 37sec):-**Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka sharafta leh, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo saxaafada Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu.

Bacda salaam, waxaynu ku guda jiryan dooddii xeerka, waa xeer muhiim ah Guddida Cadaalada iyo garsoorkuna runtii si wanaagsan ayay uga soo shaqeeyeen tacab badana runtii way galiyeen, markaa waxaan marayaa qodob kooban oo aan is dul-taago.

**Qodobka 1aad** oo ah erey bixinta guud ahaan waa sax, laakiin waxaan leeyahay sidii caadi ahaa ee aynu naqaanay ayuun baanay u qornayn markaa sidii caadiga ahayd ee ay ahaan jirtay ha loo qoro. Garsoore waxa loola jeedaa qaabkas uun dib ha loogu habeeyo ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 6aad** wuxuu ka hadlayaa mabaa'diidda guud ee xeerkan, waxaanu ka kooban yahay saddex farqadood, waxaan odhan lahaa marka la eego xeerkii hore ee kan ka horeeyey, qodobka mabaa'diida guud way ka badnaayeen. Markaa waxaad moodaa Guddidu inay xooga saareen awood garsoorka, iyada oo ay reeban tahay in maxkamadaha wax ka baxsan la isticmaalo, laakiin anuu waxaan leeyahay waxaynu leenahay dhaqan. Waxa laga yaabaa dadka qaar iyaga oo dacwadi maxkamada ka taaloo in waxa la yidhaado xeer dhaqameed ay iska isticmaalaan oo inta ay maxkamada iskala baxaan ay guddiyo wixii xaliyaan ayaa suurto gal ah.

Markaa qaab noocaas oo aynu dhaqan isaga lahayn ayaad moodaa xeerkii hore inuu shaqo siinayey oo meel ayuu u banaynayey, laakiin waxaad moodaa inay Guddidu ka saareen, markaa anigu waxaan leeyahay xeerkaa hore farqad ku jirtay oo siinaysay in haddii dhinacyadu ku heshiiyaan oo dibadda ku dhamaysanayaan laga maanicin, waayo xukumka maxkamaduhu inta badan wuu dheeraadaa, waan sababtu dadku inta badan marka arrimaha Qoyska ee markay dhaxalka noqoto u tagaan meelaha shareecada lagu dabakho.

Markaa anigu waxaan ku soo dari lahaa farqad laga tagay oo xeerkii hore ku jirtya, waxay odhanaysaa "Waxa u banaan dhinacyada is haya inay khilaafkooda u

magacawdaan Guddiyo am ula tagaan guddiyo dhex-dhexaadineed, sida dhaqanka ama shareecada iyo wixii la mid ah". Farqadaas in lagu darro ayaan leeyahay.

**Qodobka 7aad** ciwaankuun baa la rabaa siduu u qoran yahay in la saxo oo u dhigan yahay "Luuqad" oo maaha luuqan, marka halka ha dhigo "Afka Garsoorka" meel kasta oo ay ku qoran tahay "Luuqada" ha laga dhigo " Afka Garsoorka"

**Qodobka 10aad** Dhisida iyo baabi'inta Maxkamada. Maxkamadu maaha wax la dhisi karo ama al baabiin karo, waayo waa wax dastuurka ku qoran markaa anigu waxaan leeyahay ha loo dhigo sidan: - "Dhisida iyo Baabi'inta qayb maxkamadeed" ha laga dhigo oo waxay noqonaysaa marka la akhriyo warqadan "Haddii loo baahdo Guddidu caddaaladu waxay samayn kartaa qayb ka mid ah Maxkamada jirta, waxaanay baabi'in kartaa qayb ka mid ah maxkamada jirta, iyada oo loo eegayo awooda iyo imkaaniyaadka maxkamada". Maxkamaduhu waxay leeyhiin qayb, markaa haddii guddida caddaaldu u aragto inaanay ku shaqayn karrin waa la baabi'in karaa.

Haddii ay arkaan Matalan qayb ka dhiman maxkamada oo haddii ay waood u yeeshaan waa lagu dari karaa oo qayb waa laga dhigi karaa, laakiin maaha maxkamada la abuurayo.

**Qodobka 54aad** waa xilka iyo Waajibaadka Guddida caddaalada, aniga oo daba socda qodobkii hore ee abuurida ama dhisida maxkamadeed ayaa waxa ku qoran **farqada 19aad** ee qodobkan "abuurida maxkamado ama qaybo maxkamadeed oo cusub ama baabi'inta qaybo maxkamado cusub" markaa waxaan leeyahay Abuurida qayb maxkamadeed oo cusub ama baabi'inta qayb maxkamadeed oo hore u jirtay. Markaa kalmada "Maxkamado" ayaan ka saaray, qayb maxkamadeed waana la baabi'in karaa waana la dhisi karaa.

Qodobka ugu dambeeya ee **Qodobka 94aad** Awoodaha ay waaxyaha kale ee dawladu ku leeyhiin Madaxda waaxka Garsoorka. Markaa farqada **farqada 1aad** waxay u dhigan tahay "Madaxweynaha oo leh hab maamuusaadka koowaad ee Qaranka, wuxuu awood u leeyahay inuu u yeedho Guddoomiyaha Maxkamada sare ama guddida caddaalada, si uu uga waraysto habsami u socoda hawlaha waaxda garsoorka, waxna uga waydiiyo dhaliilaha iyo gafka magac xumida waaxda garsoorka ee soo gaadha, talo iyo toosina uga siiyo habsami u socodka hawlaha waaxda garsoorka.

Markaa anigu waxaan ka reebay Waxna uga waydiiyo dhaliilaha iyo gaabiska masuuliyadeed ee waaxda garsoork, waxaan ka saaray "Gafka iyo Magac xumida" markaa waxaan leeyahay mid ku haboon maaha oo eray garsoor ee ha laga saaro.

Afarta farqadood ee ka hadlaya fara-galinta waaxda siyaasada ee garsoorka, waxaad moodaa iyadoo Guddidu ka baqaya inay faro-galin u timaado matalan waaxda garsoorka ayey qodobadan ku soo dareen, markaa ana waxaan leeyahay qodobadan looma baahna farqadahani wax wayn oo macno ah oo sidaas ah ma samaynayaan waanan sababaynayaa.

Waxay yidhaahdeen waxa reeban in la faro-galiyo waaxda Garsoorka, hawlaheeda gaarka ah ee ay geedi socodkooda xeerarku jideeyeen, lagumana khasbi karo Guddoomiyaha iyo Guddida Caddaalada oo ay u isticmaalaan si ka baxsan sida waaxda garsoorka ee xeerarku jideeyeen. Farqadaaas ayuunbaa ku haboon waxa ka dambeeya wax waynoo sidaas oo ay samaynayaan ma jiro, waxaan odhan lahaa waxaan muran ahayn runtii ma kordhin karaan.

Maanta waxa weeye Guddida caddaalada iyo Guddoomiyaha Maxkamada sare xasaanad ayay leeyihiin, xasaanadu garsoorka kuma qorna Matalan, lama odhan Guddoomiyaha Maxkamada sare ilaa waligii ayuu xilka haynayaa intuu ka dhimanayo. Guddoomiyaha maxkamada sare madaxweynuhu waanu badeli karaa waanu magacaabi karaa. Waa markaad eegto arrinkeena qabaliya oo aad moodo inay siyaasado la galin karo.

Waxa haboon in qodobkaas sidiisa loo daayo ama dastuurka wax laga bedelo oo la yidhaahdo Guddoomiyaha Maxkamada sare waa life taam ama wuxuu shaqaynaynaa ilaa inta u dhaxayso 40 jir ilaa 65n oo da'da hawl gabka ah, markaa wuu shaqaynayaa mudadaas 25 sanno ah waxaanu halkaas ka haystaa xasaanad aan cidina ka qaadi karayn. Markaa waxaan soo jeedinayaa qodobada noocan ahi in wax macno ah aanay samayn in laga saaro oo inta hore loo daayo. Waxaana reeban in lagu farageliyo waaxda garsoorka hawlaheeda gaarka ah ee ay geedi socodkooda xeerarka kaw dastuurka, xeerkan iyo xeerarka kale ee dalku ay jideeyeen, waayo hawsha ay qabanayaan waxa jidaynaya dastuurka xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka, markaa hawshooda ay xeerarkaasi jideeyeen laguma farogelin karo weeye.

Waa in laga daayo oo farqadaas kale oo lagu koobo farqadan, inta dambe iyo qaybaheeda laga saaro, maadaama waxaan muran ahayn iyo waxacaynkan aanay soo kordhinaynin inta, hore lagu koobo oo laga dhigo afar farqadood ayaan soo dhawanayaan xeerka inta kalena waan taageersanahay wabilaahi Tawfiiq. Salaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

**Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijaandhe)** **(8min 25sec):-** Guddoomiye aad iyo aad baad u mahadsan tahay, waxaan aad iyo aad uga xumahay inaan halkan ku soo dhamayn waayo xeerka, hase ahaatee inta yare ee aan hayo ayaan ka yar sheekayn. Runtii sidii

raggii iga horeeyeyba sheegeen, dawladnimadu saddex dhar dhaar ayey ka samaysan tahay, saddexdaas dhar dhaar midi waxa weeyaan sharic dejin, midna waa fulintii midna waa garsoorkii.

Waayo aragnimada dalalkii ugu horeeyey waxay yidhaahdeen meelaha ugu adag ee ugu hawsha badani waxa weeyaan Garsoorka. Sababtu waxa weeye shuruucdii lagu dejiyey ee xeer-dejiyaashu sameeyeen ama Barlamaanku ayuu garsoor turjumayaa (Interpretation). Markaa waxa la yidhi waa meesha ugu adag ee ugu hawsha badan waanay ka muuqataa markaad akhrido xeerkan.

Markaa waxayabaha la inaga doonayo inay jiraan waxa weeye check and balance saddexdii dhar dhaar inay jiraan oo ay is dheelitirayaan ayaa muhiim ah. Midka kale ee muhiim ah ee ku jira mabda'iyan in laga fogeeyo in fulintu garsoorka jiidho taasi waa mabda'a koowaad ee saliga ah ee aynu ka doonayno inuu xeerkani yeesho. Haddii aad eegto guud ahaan xeerkan in aanu budgetka iyo lacagah ay yeelan doonaan inaanu ku muujisnayn siday u yeelanaan, siday u helyaan iyo siday loogu samaynayo, markaa dhaqaale ahaan haddii aanay ka fogayn fulinta oo aanu ahayn ka madax-bannaan, markaa sida budget loogu samaynayo iyo siday garsoorayaashu lacagta u qaadanayaa la eego.

Mida kale ee aan leeyahay waxay u baahan tahay in wax laga bedelo waxa weeyaan todoba Maxkamadood oo qaab dhismeedka garsoorka todobo maxkamood ayaa halkan ku taala, taas waxa ka muudqa inay aad iyo aad u farobadan yihiin iyo guddi shareeco oo dastuurka ku yaala. Runtii haddii la doonayo in dastuur wanaagsan dalka loo sameeyo waa in waxaas dib loogu noqdaa oo la is waafajiyo, markaas matalen maxkamada dastuurka waa la is waafajin karaa, waxanay u eeg yihiin qaar shaqadooda la midayn karo sida maxkamada Gobolka, Degamaha iyo abiilka awooda waa oo caadi, laakiin wax yar ayaa ka maqan.

Waxa Matalan ka maqan maxkamada degmada waxa ka sii hooseeya garsoorayaa. Waa in la yidhaa Maxkamado yar yar oo taageeraya isaga oo (subordinate courts) ayaa la yidhaa oo kuwa degmada ayey hoos imanayaan, halka laga leeyahay garsoore.
Waxa kale oo aan sixi lahaa erey bixinta garsoore oo waa in la yidhaa Garsoore waa nin aqoon sharci leh oo Jaamacada ka soo baxay baxay ayaa odhan lahaa. Waxbaa ku qoran aan sax ahayn oo la dhexgeli karo halkasna hala saxaan leeyhaya.

Waxaan ku soo gabo-gabeynayaa runtii waxa weeye aada iyo aad ayey u mahadsan Guddidii ka soo shaqaysay, waxaan ka baqayaa haddii aynaan sharci wanaagsan samayn in aakhirada la inagu caddaabo oo la ina yidhaahdo xeer xun oo dadkiibaad timaha isugu xidheen waad arbushteen si aan la inoo dhan oo aan la odhan Guddoomiye

Baashana wuu idinku hoosaynayaa oo la odhan wuu idinku hogaaminayey oo sharci wanaagsan samayno

Waxaan kaloo ku dari lahaa waxa la yidhi Maxkmada degmadu furitaanka iyo waxaas ayey qaabilsan tahay, waxaan odhan lahaa si furniinka iyo waxan loo yareeyo furniinka Maxakamadaa dibadooda ka dhacayo oo kale oo ninku intuu istaago odhanayo saddexdiibaad iga tahay oo maxkamadaha uun la odhan karo waa ansax oo shareecada islaamku waxay ka qabtana aad u garan maayo, taasi waxay keenaysaa in dad gidaar walba isku furaya inay yarayso.

Waxa kale oo aan ku darayaa shaqaaqooyinka shilalka baabuurka inay xukumi marto maxkmada degmadu, waan in lagu daraa iyo in lagu daro shaqaalaha la isku qabto taasna waataas. Markaa shaqaada deegaanka Matalan waxaan tagay Laascaanood adiguna guddoomiye waa digii joogay, markaa waxaan jirin Rule of law meel loo dacwoodo ayaan jirin oo bolis u tagaa ma jiro ama ma heli karaan (Accessable) waanay ka fogtahay waa inuu maalmo u lugeeyaa oo habeeno u dhaxaan. Shaqaaada waxa sababa markayn waayeen maxkamadihii oo ilaa Burco ilaa Gar'adag Maxkamadi ma jiro, markaa dadku markii ay waayeen booliisk u taga lahaa oo kala qaban lahaa oo warmaha isla dhacaan ayeynaan la yaabin.

Markaa waa inaynu nidhaa degmada kasta oo jirta waa in maxkamad degmo loo helaa, wax badan inagu qaadan maysee waa in aynu ka hawl galnaa taasina waxay yaraysanaysaa shaqaaqooyinka deegaanka ka dhac. Guddoomiye muraayadii ayaan kai mi raali ha la iga ahaado Salaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal** **(7min 10sec):-** Shir-guddoonka, Xildhibaanada, saxaafada iyo Kaaliyaasha Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu.

Guddoomiye waxa aynu nahay dal Islaam ah, Dastuurkeenuna uu sheegayo in xukun kasta oo shareecada khilaafsani in aanu shaqaynayn. Waxa marka ugu horaysa aan doonayaa in aan taabto, waxa jirta Mab'da ama u jeedo shuruucda adduunka u ahtilmaam ama ugu horeeya. Mabda'aasi waxa weeye qofka marka la soo eedeeyo qofkaasi dembi ma qabo ilaa maxkamadi ku cadayso oo dambi lagu helo markaas ayuu dambiile noqonayaa.

Waxa aynu xasuusan nahay had iyo jeeraale marka tuhun yimaado qaadiga ugu horeeya ee qof kaas xukumayaa uu naqdo dadweynaha iyo saxaafada oo yidhaa hebel waa la xidhay oo uu ceeboobo isaga oo aan waxba lagu helin wali aanu dambiile noqday. Waxaan jeclahay u jeedada marka la sheegayo awoodaha garsoorka in xarafka (T) ee shuuruucda islaamka waxa laga horaysiiyey shurrucda dalka, waxaan odhan lahaa waa

in laga horaysiiyaa shuurcda Islaamka. Kuwa kalena waa inay noqdaan wax kaabaya kuwa ka soo baxa Golaha.

Waxa kale oo aan doonayaa oo halkan ku qoran markii la tiriyey maxkamaduhu waxay noqdeen todoba maxkamadood oo ta ciidanka ayaan kugu dambaysa, markaa inagu halkan kuma ahayno waxa lagu xukumo oo halkan kuma qorna waxa inasoo maray oo anuu maxkadamad ciidanka waxaan u aqaan in marka ciidanku wax gaystaan xukun la yidhaa court martial in lagu xukumo oo ka baxsan ka madaniga ah. Waxaynu aragnay maxkamado ciidan oo qof shacbi ah dambi kasta ha gaystee xukumaya. Xamkamadaas ciidamada waa in xeerkeedu halkan yimaad.

Waxa kale aan dalbanaynaa in xeerka madaniga ah iyo xeerka ciqaabta guud iyagana la inoo keeno oo iyaga aynu eegno waxay kan isku khilaafsan yihiin iyo waxa kale. Waxaan doonayaa in ay noo baxsanaato dhaqanka boolisku u dhaqamayaan oo ka baxsan sharciga. Waxa jira qof la doonayo matalan dambi kasta ha loo haystee in la soo qabto la kari karo in looga yeedho oo la yidhaa kaalay booliskaa ku doonaya oo waxbaa lagu weydiinayaa hadh maalin weyn oo dabadeeto marka laga dhamaysto haddii uu looyar qabsanayo looyarkiisa qabsado haddii markaa wax laga dhamaysan waayo ay noqoto in la xidho la xidho, laakiin waxaan la aqbali karayn ciidan loo samaystay Argagixisada oo la yidhaa RRU (Rabid Response Unit) inay guryaha habeeni guryaha ugu soo dhacaan oo carruurta iyo dumarka umusha ah guryaha ugu soo dhacaan, waxa weeye RRU waa in nidaamn loo sameeyaa waa in, waa in tababar loo sameeyaa waa in dhisibilin loo sameeyaa ka soo dirayaana aanu soo dirin.

Waxa weeye waxaan halkan ku hayaa dastuurkeena 28 maadadood qabyo yihiin soo lama ansixi 2001. Xabsiyada iyo booliska ayaa laga yaaba inay shuruucda la soo geliyey intii kale waa qabyo. Dastuurka ha lagu nqodo ha la eego waxyaabaha qabyada oo ha la dhamaystiro haddii kale sharci noqon maayo.

**Md. Maxamuud Axmed obsiiye (minsec):-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Saxaafada iyo Marti salaanta Islaamkan idinku salamaaya ASC, salaam ka bacdi dhowr qodob baan ka hor marinayaa intaanan guda galin xeerka oo muhiim u ah doodda.

Xeerkan ina horyaalaa waxa uu ku magacaaban yahay wax ka badala iyo kaabis, runtii waxaad moodaa inuu xeer yahay la soo dhisay oo la soo abaabulay ee aanu kaabis ahayn, markaynu xeer ansixinayno iyo markaynu wax ka badal iyo kaabis ansixinayno way kala duwan tahay, kaabis markaynu ansixinayno waa in dhowr qodob oo kaabis ah intay qoladii ku shaqada lahayd ama xukuumadu soo gudbiso baa la gali jiray, laakiin Xeer dhamaystiran oo sidiisii loo soo badalay dee inaynu xeer u ansixinayno weeye ee maaha kaabis iyo wax ka badal in la yidhaahdo, Xeerkii haduu dhaqangalay marka kaabis lagu samaynayo waa in wax kooban laga badalo sida qodobadiisii shaqayn waayay ee u baahday in la badalo.

Qodobka kowaad ee aan ka hadlayaa Xeerka waxa weeye awoodda Maxkamadaha, horta Maxkamaduhu waa shan ay Maxkamada sare ugu sarayso, Maxkamada sarena shaqadii Maxkamada Dastuuriga iyo Maxkamada Cadaaladda ay awooddeeda leedahay, laakiin dastuurku wuxuu qorayaa inay Maxkamaduhu yihiin shan, sidaa darteed, Maxkamad kale oo ay jideeyaan cid kale ama abuurto ma banaana kol hadii dastuurkii lagu dhaqmayo iyadoo dastuurka la badalo mooye, marka maxkamad kale ma imanayso.

Qodobka ugu muhiimsan ee halkan ku jira waxa weeye in maxkamad shanta ka baxsan la keeno waa iyadoo dastuurkii laga hor yimi, hadii garnaqsi la doonayo gar-naqsiga waxa gala shantaas maxkamadood, hadii kale waxa galaya maxkamadaha shareecada islaamka ku dhaqmaya oo go'aamo iyo fadwona samaynaya kuwaas oo xafiisyo madax banaan iska leh iyo kuwa dhaqanka oo iyaguna go'aamo soo saara meel-mar ah oo la tixgaliyo, marka mushkiladu maaha siday u jiraan? Laakiin mushkiladu waa sidee baynu u dhexgalin karnaa Maxkamadahaas jira inay wada shaqeeyaan, waynu ognahay oo Maxkamadaha shareecadu waxay la assaasmeen Somaliland waxayna qaateen door wax ku ool ah oo dejinta iyo xasiloonida Somaliland qaybta ugu wayni ka tahay, xataa qayb ay maxkamaduhu ka gaabiyeen doorkaas oo kale qaataan.

Maaha inay Maxkamaduhu la'yihiin aqoonyahan iyo kaadir aqoontii leh, laakiin waa hanaanka (procedure) ay soo marayso iyo muddada ay qaadanayso dacwadu ayaa keentay in laga leexdo oo xaga shareecada oo xeerkii iyo kalsoonidii lagu qabay inay shareecadu waxay tidhi oo labadii dhinacba ku kalsoon yihiin ay ula tageen. Marka anigu waxaan leeyahay waa muhiim inaynu sameyno sidii loo badbaadin lahaa arrintaas, iyaguna ay u soo gali lahaayeen garsoorka, garsoorkuna uu la shaqayn lahaa oo ay ka mid ahaan lahaayeen hay'addaha garsoorka.

Hadaba siday ku dhacda taasi? Waxay ku dhacda qodobkan inta badan la daada'faynayo hadii wax ka badal lagu sameeyo oo aan anigu soo jeedinayo in Qodobka 10aad siduu u qornaa laga badalo waa la heli karaa in Xafiisyadan gaar ah inay garsoorka soo galaan, dhisida iyo baabi'inta xafiis maxkamadeed hadii la yidhaahdo, ilayn maxkamadu waa xafiis, markaa dhowr xafiis waa la baabi'in karaa xafiisna waa la dhisi karaa, tusaale Degmada Boorame hadii afar ka dhisan yihiin shan waa laga dhigi karaa, hadii afartu ku badan tahayna mid waa laga dhimi karaa, oo xafiis uun buu noqonayaa laakiin wuxuu hoos imanayaa Maxkamadihii afarta ahaa marka laga saaro Maxkamada Militariga, waana si aynu u helno inay Maxkamaduhu sii jiraan oo loo baahan yahay lama baabi'in karo lagamana hortagi karo, sharci daro inay ku shaqeeyaana dee dhibteeday leedahay.

Anigu waxaan aaminsanahay dadkan abaabulay iyo door fiican ama doorkoodii qaateen oo loo baahan inay maanta soo galaan xayndaabka garsoorka, waxayna ku soo galayaan marka Qodobkaas sidaas loo badalo **"Gudidda Cadaaladu waxay samayn kartaa Xafiis Maxkamadeed cusub oo ka mid ah Maxkamad jirtay**" markaa halka waxaa ku badbaadaya labadoodiiba, arrintaasi waa arrinta ugu muhiimsan mid cusubna looma samayn karo mar hadii dastuurkii aanu jidaynayn, laakiin waxay la shaqayn karaan

maxkamadaha jira habkay ku shaqayn lahaayeen waxaa soo dhigaya Gudidda Cadaaladda.

Waxaa lagama maarmaan ah, markaynu Xeerkan akhariyayno aynu la akhrino Xeerarka kale oo muhiima sida xeerarka Ciqaabta Guud iyo Xeerka Madaniga oo hadii aan la ansixina la keeno si loo ansixiyo, labadaas Xeer ee aynu ka hadlaynaa waa kuwa ay ku salaysan yihiin arrimahan aynu ka hadlayno ama habka (procedure) la marayo.

Hore ayaan u sheegay arrinta ugu muhiimsan waa maxkamadaha hor-taagan ee ay dadku dhibsanyaan inta badan waana hab-dhaqanka (procedure) ay ku dhaqmaan, tusaale, waxay leeyihiin qaraar iyo xukun bay siiyaan, qaraarna waa dulucdii oo aan la gaadhin baa qaraar laga soo saaray, xukunkuna waa marka dulucdii la gaadho oo xukun kama dambeys ah la dhiibo ayay maxkamadu soo saaraysaa, marka Maxkamadii Degmadu, tii Gobolku, Tii rafcaanku iyo tii sare intuba waxay soo saaraan qaraar aan dhamaystirnayn ka dibna dacwadii halkaas ku qaadanaysaa dhowr sanno, taas weeye dhibta taalla, si looga badbaado arrintaas waa in inta Maxkamad walba xukun deg-dega qaadato iyadoo xeerarkii sharceeda islaamka maraysa iyo Xeerarkii Maxkamadaha si deg-dega loo helo, taasna waxaa lagu helayaa Xaakinkoo marka ugu horeysa aan mudiciga iyo mudacalayhiga aan simin oo aan ka dhigin laba doodaysa, markastana doodda maaha inay gasho oo marka ninka mudiciga ahi cadayn keeno ayaa dood gali karta marka cadayntiisa waliba la sugo, hadii ay cadeyntiisu sugnaan waydo waa inuu dhaar keeno, waayo mudicuga cadayntuu leeyahay mudaacalayhigu dhaartuu leeyahaye, marka xukunkaas ayaa waxa lagu gaadhayaa wax ka yar nusasaac, marka halka waxaan u baahanahay procedure-ka la marayo shareecaduna waxaas oo dhan way inoo iftiimisay wuxuu ku xukumayo.

Qodobka ku xiga ee aan doonayo isna inaan ka hadlo waxa weeye, muddada ay ku dhamaanayso ma xadiddna, Xeerkana kuma xadiddna garsoorkana sidaynu ognahay waxay qaadanaysa intay rabto dacwadu, xaqiiqada in la gaadhona waxay ku fiican tahay in si deg-dega loo gaadho, dadkana aanay ku noqon dhib oo waddo qaloocan la marin, anigu waxaan soo jeedinayaa in wakhti xadiddan la siiyo oo Maxkamada Degmada oo kale laga dhiga inay muddo bil gudaheed ah ku dhamayso laga biloobo maalinta baadhista lagu bilaabo, Maxkamada Rafcaanka waa inay laba bilood gudahood ku dhamaysaa, tan sarena laga dhigo muddo saddex bilood ah.

Tan kale, waxaa jira Qodob Dastuuriya oo Xeer baa qeexaya way inagu badan tahay, **Qodobka 106[aad]** wuxuu jidaynayaa in la sameeyo Maxkamadii Ciidamada, Maxkamada Ciidamadu way qoran tahay hadana lama hayo wax xeer oo ku saabsan cidii masuulka ka ahayd Xeerkaasna inay keento waa lagama maarmaan.

Waxa jira oo halkan ku cad in garsoorayaashu kala leeyihiin darejooyin, eray-bixintana kuma jirto darejo, xeer cadaynaya sida loo kala leeyahay darajooinkana ma jiro, marka derajadu waxay ku xidhan tahay wakhtiga uu soo galay, marna waxay ku xidhan tahay

xiliga uu shaqaynayay iyo inta labadaas u dhaxaysa kala horayntii baana muhiima inay sidaas u kala horeeyaan, Marka Xeerkaa Qodobkaasna ha lagu cadeeyo.

Qodobka Dhaarta Garsoorayaasha oo isna muhiim ah, dhaartaas marnaba halkan waxba lagagama soo qaadin, dastuurkuna ma qorayo Xeerna muu jidayn, qofku shaqo muhiima oo sidan oo kale ah marku qabanayo waa inuu dhaarta, Marka waxaan soo jeedinayaa waa in Xeerkan lagu muujiyaa oo lagu daraa dhaartii iyo waliba siduu u dhaaran lahaa, anigu waliba waxaan isleeyay in laga dhigo ***"waxaan ku dhaaranayaa inaan si cadaalad ah oo waafaqsan sharceeda Islaamka ugu garsooro dacwaysanayaasha".***

Qodobka kale oo doodda soo galay isna waxa weeye awoodda Golaha Wakiilada oo hadii Xeerku soo gaadho Golewaynaha in dib loo celiyo ma banaana, hadii daneeyayaashu rabaan inay wax ku soo daraana waa in inta Gudiddu Xeerka gacanta ku hayso oo aanu Golewaynaha iman waxay doonayaan la soo eegaan.

**Guddoomiyaha:-** Mudanayaal dooddii way dhammaatay barri waxa la guddo galayaa xeerkii Is-maamulka Gobolada iyo Degmooyinka ee Xeer Lr. 23, Guddiduna ha soo diyaariso warbixinta, fadhigu waa inoo xidhan yahay waa inoo barri.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ________________________ | ________________________ |